




DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

**WASAARADDA QORSHAYNTA,
HORUMARINTA DHAQAALAH A IYO
ISKAASHIGA CAALAMIGA AH**



**QORSHE HAWLEEDKA WASAARADAH A IYO
HAY'ADAH A DAWLIGA AH 2025**

Daabacadii II^{aad}

TUSMO	BOGGA
Ararta Buugga	I
Kalmadda Madaxwaynaha	II
Kalmadda Wasiirka	III
TIIRKA 1aad: SIYAASADDA LOO DHANYAHA	
Arrimaha gudaha, Federaaleynta iyo Dimuqraadiyadda	1
TIIRKA 2aad: AMNIGA IYO SARRAYNTA SHARCIGA	
Amniga	3
Cadaaladda iyo sarreynta sharciga	4
TIIRKA 3aad: HORUMARINTA DHAQAALAHA	
Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha Iyo Iskaashiga Caalamiga Ah	6
Maaliyadda	8
Ganacsiga, Wershadaha iyo Maalgashiga	10
Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda	12
Xannaanada Xoolaha	14
Beeraha iyo Waraabka	15
Horumarinta Dekedaha	19
Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta	20
Warfaafinta, Isgaarsiinta, Tiknoolojiyadda iyo Dalxiiska	22
Duulista Hawada iyo Garoomada	23
Tamarta, Macdanta iyo Shidaalka	24
Deegaanka, Daaqa iyo Isbedelka Cimilada	26
Bangiga dhexe ee Dawladda	28
Maareynta Xogta Biyaha Iyo Dhulka	29
Hanti-dhawrka Guud	30
TIIRKA 4aad: ARRIMAHA BULSHADA	
Caafimaadka	32
Waxbarashada	36
Shaqada iyo Arimaha Bulshada	39
Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyin	40
Horumarinta Haweenka iyo Arrimaha Qoyska	42
Dhallinyarada Iyo Ciyaaraha	43
Horumarinta Biyaha	44

ARARTA BUUGGA

Buugga Qorshaha Dawladda waa qorshe la diyaariyo sanadkasta bisha January, kaas oo ay diyaariso iskuna dubbariddo Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ee Puntland.

Buugga qorshaha 2025 waxaa lagu naax-naaxiyey laguna ballanqaaday horumarinta dhismaha dawladnimada, sugidda amniga, kobcinta dhaqaalaha, bixinta adeegyada bulshada, xoojinta garsoorka iyo sarreynta sharciga, daryeelka deegaanka iyo isbedelka cimilada, horumarinta dhalinyarada iyo haweenka.

Buugga qorshaha sanadlaha waxaa saldhig u aha mudnaanaha qorshaha shanta sano ee horumarinta Puntland PFYDP-4 iyo tiirarka jiheynta barnaamijka Madaxweynaha ee 2024-2029. Qorshaha xukuumadda 2025 waxaa ku dhan dhammaan qorshe hawleedyadii Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladdu ay soo gudbiyeen, waxaana loo diyaariyey habka ugu fudud iyada oo la isku raaciyey qaabka shaqa wadaaga ay u yihiin sida, siyaasadda loo dhanyahay, sugidda amniga, sarreynta sharciga, horumarinta dhaqaalaha, arrimaha bulshada iyo dhawrista deegaanka iyo isbedelka cimilada.

Ujeedadda qorshe hawleedka Dawladda wuxuu ahaa in Hay'adaha Dawladdu yeeshaan Qorshe sannadeed cad oo ku salaysan mudnaanaha qorshaha shanta sano ee Puntland iyo in lagula xisaabtamo fulinta hawshii ay qorshaysteen, arrintaas oo dhabaha u xaareysaa huf-naanta Dawladnimada iyo kalsoonida shacabka.



KALMADDA MADAXWAYNAHA

Laga soo bilaabo aasaaskii Puntland, 26kii sano ee la soo dhaafay, Puntland waxa ay ku tallaabsanaysey horumar muuqda oo la taaban karo. Hadaba si loo xoojiyo horumarka iyo waxqabadka Xukuumadda aan hoggaamiyo waxa ay bilowgiiba qabatay shirkii jihataynta Xukuumadda taas oo lagu dajiyay barnaamijka Xukuumadda Shanta Sano ee soo fool-leh (2024-2029) ayadoo la dhaqan gelinayo qorshihii hiigsiga Puntland 2040 ee aan daahfurnay sannadkii 2022 kaas oo tilmaamaya dhabbaha hayaanka Horumarka Puntland ilaa 2040.

Qorshaha Xukuumadda 2025, oo ah kan maantay idin horyaal kana kooban afar tiir oo waaweyn kuwaas oo kala ah; Siyaasadda loo dhanyahay, Amniga iyo Sarreynta Sharciga, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Arrimaha Bulshada isla markaana waafaqsan qorshaha Madaxweynaha ee 2024-2029 iyo qorshaha shanta sanno ee Puntland PFYDP4, waxaa si ficil ah loo gaarsiin doonaa bulshada adeegyadii ay balan qaaday xukuumaddu taas oo ay ka dambeeyso isla xisaabtan .Haddaba, si looga dhabeeyo xaqiijinta iyo fulinta Qorshaha 2025, waxaa Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda lagala xisaabtami doonaa waxa ay qabanayaan, wakhtiga ay ku qabanayaan iyo meesha ay ka fulinayaan taas oo looga golleeyahay Daah-furnaan, Hufnaan iyo Isla-xisaabtan. Ugu danbeyntii waxaan u mahadcelinayaa Eebbe Weyne oo noo suurta-geliyey diyaarinta hawshaan baaxada leh iyo dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda ee ka qayb qaatey. Sidoo kale, waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa kooxdii soo diyaarisay buugga Qorshaha Sannadka 2025 ee Xukuumadda oo ay hormuud u ahayd Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta dhaqaalaha iyo xiriirka Caa- lamiga ah Puntland. Gabagabadii, waxaan halkaan ka bogaadinayaa doorka shacab-weynaha reer Punt- land iyo sida ay diyaar ugu yihiin garab istaaga Dawladdooda.

Eebbaa Mahad iska leh
Dr. Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dawladda Puntland.



KALMADDA WASIIRKA

Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Xiriirka Caalami-ga waxay diyaarisay qorshaha sannadlaha ah ee dhammaan Wasaaradaha iyo Haya'daha Dawladda Puntland ee sannadka 2025. Iyadoo laga duulayo tiirarkii qorshaha madaxwaynaha 2024 iyo qorshaha shanta sano ee Puntland (PFYDP-4).

Buugga qorshe-sanaddeedka Dawladda wuxuu fududeynayaa fulinta halbeegyada horumarineed ee Hay'adaha Dawladda heerarkooda kala duwan, iyadoo loo marayo xaqiijinta hawlaha horutabinta leh ee qorshaha xukuumadda.

Buuggan waxaa ku dhan dhammaan qorshe howleedyada sannadlaha ah ee ay soo gudbiyeen Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda Puntland, qorshahan waxaa lagu samayndoonaa qiimayn dhamaadka sanadka si loo ogaado waxa ka qabsoomay wixii aan qabsoomin iyo sababaha ay u qabsoomi waayen.

Waxaan u mahadcelinayaa kooxdii isku dubariday Buugga ee Wasaaradda Qorshaynta oo uu ugu horeeyo Agaa-simaha Guud ee Wasaaradda Cabdulqaadir Cabdidaahir Faarax iyo dhamaan Hay'adaha Dawladda oo fududeeyay soo gudbinta qorshahooda. Ugu danbeyn waxaan halkan mahadcelin gaar ah uga dirayaa kooxdii farsamo ee diyaariyey buugga Qorshaha Dawladda ee sannadka 2025, oo si xilkasnimo iyo aqoon ku dheehan-tahay u gutey shaqadii loo idmaday, kuwaas oo ka koobnaa waaxda qorshaynta iyo waaxda istaastistikada ee Wasaaradda Qorsheynta.

Mr. Daa'uud Maxamed Cumar
Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta
Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah

TIIRKA I^{aad}

SIYAASADDA LOO DHANYAHA

WASAARADAHA IYO HAYA'DAHA DAWLADDA EE HORMUUDKA U AH TIIRKAN

1 Arrimaha gudah, Federaaleynta iyo Dimuqraadiyadda

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA IYO DIMUQRAADIYEYNTA							
QORSHAHA	WAXQABADKA LA FILAYO	MEESHA, BARTA LA JOOGO	BARTILMAAMEED	WAKHTTIGA		SADDEX BILOOD-KA	DEGMADA
				Bilaabasho	Dhammaad		
1. Nidaamka hanaanka dimuqraadiyaynta	1.1 Kulamo wacyigalino kor loogu qaadayo fahamka dimoqraadiyeynta oo lagu qabanayo Degmooyinka.	85%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Gobolada Puntlnd
	1.2 Qabashada iyo fariisinta Doorashada Gudoomiyaha & G/kuxigeenka Goleyaasha deegaanka ee dhiman.	90%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Jariiban, Murcanyo
	1.3 Mudnaansiinta ka qayb galka haweenka ee hanaanka hal qof iyo hal cod ee golyaasha deegaanka Dowladaha hoose.	45%	100%	Jan-25	Aug-25	S1-S3	Dhamaan Gobolada Puntlnd
2.Siyaasadaha,xeerarka iyo habraacyada	2.1 Dib u eegista xeerka maamulka iyo Gobolda Law No.7.	70%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Wasaaradda Arrimaha Gudaha/ Degmooyinka
	2.2 Dhamaystirka xeerka qaxootiyada (Refugee Act)	75%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Degmooyinka
	2.3 Dib u eegista xeerka midaynta canshuuraha dowladaha hoose	65%	100%	Jan-25	Aug-25	S1-S3	Degmooyinka
	2.4 Dhamaystirka siyaasadda diiwaangelinta madaniga ah	50%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Wasaaradda Arrimaha Gudaha/ Degmooyinka
	2.5 Dib u eegista siyaasaddaha maamulka iyo maaliyadda (Finance policy,procument policy,HRM policy)	40%	85%	Jan-25	Dec,- 25	S1-S4	Wasaaradda Arrimaha Gudaha
	2.6 Dhamaystirka habraaca oday dhaqameedka(nabadoonada & Isimada).	80%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Wasaaradda Arrimaha Gudaha/ Degmooyinka
	2.7 Dhamaystirka habraaca koormeerka iyo qiimeeynta (Monitoring and evaluation framework)	60%	100%	Jan-25	Dec,- 25	S1-S4	Wasaaradda Arrimaha Gudaha
3. Maamulka iyo Qorsheynta	3.1 Qabashada kulamada maamul wanaaga ee loo dhanyahay.	40%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Wasaaradda Arrimaha Gudaha
	3.2 Diyaarinta qorshaha 5ta sano ee hormarinta qaar ka mida Degmooyinka DDF	65%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	20 Degmo ee ka mida deeganad Puntland
	3.3 Ka taageerida qabashada qorshe sanadeedka iyo Miisaaniyada ee Degmooyinka	70%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan degmooyinka Puntland
	3.4 Kor joogtaynta iyo qiimeynta qorshe hawleedka waaxyaha Wasaaradda iyo mashaariicda hormarinta Degmooyinka	65%	90%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan degmooyinka Puntland
	3.5 Diyaarinta heshiisyada Qorshaha Maaliyadda ee dakhliga Wasaaradda.	50%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	wasaaradda arrimaha Gudaha
	3.6 Dhaqangelinta iyo dhameystirka nidaam xisaabeedka Wasaaradda (PFMIS).	30%	70%	Apr-25	Dec-25	S2-S4	wasaaradda arrimaha Gudaha
	3.7 Dib u habaynta kaydka Wasaaradda (Archeive)	50%	75%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	wasaaradda arrimaha Gudaha
	3.8 Dib u eegista diiwaangelinta agabka Wasaaradda iyo tirokoobka gaadiidka	70%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	wasaaradda arrimaha Gudaha
4. Hirgalinta iyo xoojinta fahamka nidaamka Federaalaynta dalka.	4.1 Qabashada kulamo lagu xoojinayo xiriirka iyo iskaashiga hay’addaha Dawladda iyo wacyi-gelinta bulshad arrimaha federaalaynta.	65%	90%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	wasaaradda arrimaha Gudaha
	4.2 Faafinta farriimo wacyigelineed oo ku saabsan fahamka nidaamka federaalka soomaaliya.	60%	90%	Jan-25	Aug-25	S1-S3	wasaaradda arrimaha Gudaha

5.Maamul baahinta iyo adeeg gaarsiinta bulshada.	5.1 Diyaarinta qabashada iyo dhamaystirka barnaamijka FMISka ee qaar ka mida Degmooyinka	40%	75%	Jan-25	Aug-25	S1-S3	Jariiban, Eyl, Bandarbeyla, Galdogon, Ufeyn, Xarfo iyo Waaciye
	5.2 Diyaarinta qorshe howleedka dakhli kicinta qaar ka mida Degmooyinka	40%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Galkacayo, Qardho, Carmo, Ufeyn iyo Xarfo
	5.3 Dib-u eegista iyo koorjoogtaynta mamul dadajinta xarumaha caafimaadka iyo waxbarashada ee Degmooyinka lagu wareejiyey.	20%	50%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Galkacayo, Qardho, Garowe,Bosaso
	5.4 Hirgelinta mashaariic hormarmarineed ee qaar ka mida Degmooyinka	65%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhahar,Badhan, Dangaronyo, Bargaal,Waaciye ,Carmo, Ufayn,Bosaso, Garowe
	5.4 Diyaarinta Sanduuqa dhaqaalaha hormarinta Dowladdaha hoose ee PL.	10%	50%	Jan-25	Dec-25	S1-S5	Qaar ka mida Deg.
	5.5 Kordhinta Degmooyinka Iyo Tuulooyinka Ka Faa’idaysanaya Barnaamijka Diwaangalinta Dhalashada Caruurta Ee Puntland.	20%	50%	Apr-25	Dec-25	S2-S4	Badarbeyla, Bosaso,galkacayo iyo burtinle
	5.6 Qabashada tababaro kor loogu qaadayo aqoonta golayaasha deegaanka iyo shaqaalaha Dowladaha hoose	80%	90%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	36 degmo ee deegannada Puntland
	5.7 U qareemida helitaanka adeegayada asaasiga ah iyo arrimaha gargaarka ee reer guuraaga	15%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Gobollada Puntlnd
6. Barakacayaasha, Qaxotiyada iyo Mangan-galyadoon ka	6.1 Diiwaan gelinta qaxootiga, barakacyasha magan-gelyo doonka ku nool Puntland	70%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Galkacayo, Garowe, Bosaso, Qaardho, Burtinle iyo Badhan, Waaciye
	6.2 Hirgelinta Dhismayaal guryo ee barnaamijka xalka waara.	50%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Degmooyinka
	6.3 Dib u dejinta barakacayaasha iyo mangalya doonka ee deegaanada PL	60%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Garowe,Galkacayo Bosaso
	6.4 Tababaro loo qabanayo gudiyada xalkawaara, bulshada rayidka ah shaqalaha WAG iyo shaqalaha D/hoose	60%	85%	Jul-25	Dec-25	S3-S4	Bosaso,Eyl, Garowe, Qardho iyo Galkcyo
	6.5 kor u qaadista kobcinta dhaqaalaha dadka nugul ee barakacyaasha/qaxootiyada.	45%	70%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Garowe iyo Bosaso
7. Nabadaynta iyo dib u heshiisiinta	7.1 Qabashada kulamo wacyigelin ku aadan arrimaha nabadeynta iyada oo laga qabanayo dhamaan gobolada.	50%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan gobollada Puntlnd
	7.2 Fulinta sahanka khariidadeynta khilaafaadka aloosan ee Gobolada iyo Degmooyinka	30%	70%	Jul-25	Dec-25	S3-S4	Dhamaan Gobolada Puntlnd
	7.3 Kulamo la xiriira nabadaynta Iyo dib u heshiisiinta beelaha khilaafaadka Iyo colaaduhu dhexmareen.	45%	75%	Apr-25	Dec-25	S2 -S4	Qaar ka mida Deg.
8.Arrimaha khuseeya wacyigalinta iyo hortagida masiibooyinka	8.1 Wacyi-gelinta iyo ka hortagida masiibooyinka ka dhacaa heer degmo Puntland	50%	70%	Apr-25	Dec-25	S2 -S4	Degmooyinka
	8.2 Dib u dejinta iyo la tacaalida deegaanada ay aafaysay masiibooyinka	10%	40%	Jul-25	Dec-25	S3-S4	Degmooyinka
	8.3 Soo Ururrinta Xogta Sahanka Xaaladaha ay ka jiraan daaq la’aaanta, biyo yarida iyo hoy la’aanta ee aan la wadaagno wasaaraddaha ay khusayso.	10%	50%	Jul-25	Dec-25	S3-S4	Dhamaan Gobollada Puntlnd
9.Arrimaha dhaqanka (Nabadonada & Issimada)	9.1 Diiwaangalinta iyo samaynta kaararka aqoonsiga ee oday dhaqmeedka.	5%	40%	Jul-25	Dec-25	S3-S4	wasaaradda arrimaha Gudaha
	9.2 kulamo la xiriirra arrimaha xalinta khilafaadka oo lagu tababarayo oday dhaqameedka.	10%	40%	Jul-25	Dec-25	S3-S4	Dhamaan Gobollada Puntlnd
	9.3 Diyaarinta dhismaha xarumo ay yeeshaan oday dhaqameedyada laguna Kaydiyo Heshiisyada beeluhu ay gaaraan.	10%	50%	Apr-25	Dec-25	S2-S4	Badhan, Qardho, Galdogon iyo Garowe

TIIRKA 2^{aad}

AMNIGA IYO SARRAYNTA SHARCIGA

WASAARADAHA IYO HAYA'DAHA DAWLADDA EE HORMUUDKA U AH TIIRKAN

1	Amniga
2	Cadaaladda iyo sarreynta sharciga

WASAARADDA AMNIGA & DDR							
QORSHAHA	WAXQABADKA LA FILAYO	MEESHA, BARTA LA JOOGO	BARTILMAAMEED	WAKHTTIGA		SADDEX BILOOD-KA	DEGMADA
				Bilaabasho	Dhammaad		
1. Diyaarinta Strategyada shanta sanno.	1.1 Diyaarinta strategyada shanta sanno Wasaaradda Amniga & DDR	10%	100%	Jul-25	Dec-25	S3-S4	Dhamaan Dowladda
2. Dib u habaynta & tayaynta Ciidamada qalabka Sida	2.1 Diyaarinta qorshaha iyo istiraatiijiyada dib u habaynta iyo dib u qaabaynta ciidamada qalabka sida.	10%	100%	Jan-25	Jul-25	S1-S3	Dhamaan Dowladda
	2.2 Dib u eegista xuquuqaha & kaalmada ciidamada qalabka Sida.	10%	100%	Jan-25	Jul-25	S1-S3	Dhamaan Dowladda
3. Ciribtirka shabakadaha Argagixisada	3.1 Dhamaystirka siyaasadda/xeerka la dagaalanka Argagixisada.	50%	100%	May-25	Dec-25	S2-S4	Dhamaan Dowladda
	3.2 Diyaarinta istiraatiijiyada guud ee cirib-tirka shabakadaha Argagixisada.	10%	100%	Jan-25	Sep-25	S1-S3	Dhamaan Dowladda
4. Hub ka dhigista & dhaqan-celinta	4.1. Dhamaystirka siyaasadda iyo xeerka xakamaynta hubka, rasaasta iyo Gaadiidka dagaalka.	30%	100%	Jul-25	Dec-25	S1-S3	Dhamaan Dowladda
	4. 2. Dhismaha kaydka hubka ee Gobolada sida Bari, Ras Asayr, Nugaal, Mudug iyo Karkaar.	10%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Bari, Ras Asayr, Nugaal, Mudug iyo Karkaar.
	4.3. Diyaarinta Siyaasadda Dhaqan-Celinta.	10%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
5. Horumarinta siyaasadaha iyo xeerarka Amniga.	5.1. Dhamaystirka siyaasadda/xeerka la dagaalanka Argagixisada.	50%	100%	May-25	Dec-25	S2-S4	Dhamaan Dowladda
	5.2. Dhamaystirka siyaasadda/xeerka xakamaynta hubka Puntland.	50%	100%	May-25	Dec-25	S2-S4	Dhamaan Dowladda
	5.3. Dhamaystirka siyaasadda iyo xeerka illaalada madaniga.	20%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	5.4. Dhamaystirka siyaasada iyo xeerka Hay, ada sirdoonka Puntland.	30%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	5.5. Dhamaystirka Xeerka Ciidanka Booliiska Puntland	50%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda

WASAARADDA CADAALADDA							
QORSHAHA	WAXQABADKA LA FILAYO	MEESHA, BARTA LA	BARTILMAAMEED	WAKHTTIGA		SADEX BILOOD-KA	DEGMADA
				Bilaabasho	Dhammaad		
1. Xoojinta qaab-dhismeedka Xeerarka iyo Siyaasadaha	1.1 In la dardargeliyo fulinta sharciyada iyo siyaasadaha	30%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	1.2 Qabyo qoraalka, wax ka beddelka iyo dib u eegista sharciyada	30%	75%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	1.3 Faafinta, wacyigelinta iyo kordhinta wacyiga dadweynaha	40%	65%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
2. Horumarinta Helitaanka Cadaaladda iyo loo marayo habab kala-duwan.	2.1. baahinta helitaanka cadaaladda iyadoo loo marayo nidaamka garsoorka iyo mid garsoor dhaqameedka.	30%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	2.2 Kor u qaadista heer aqooneed iyo farsamo ee bahda cadaalada	30%	75%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	2.3 Joogtaynta shirka isku xirka bahwadaagta cadaalaada oo la qabto saddexdii biloodba mar.	80%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	2.4 Shirka isku xirka bahwadaagta cadaaladda ee Gobolada bishiiba mar	0%	50%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	2.5. Kaalmaynta bulshada dhanka sharciga	20%	45%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	2.6 Dhisida xafiiska cashada dadweynaha ee maxkamadaha	0%	40%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	2.7 Horumarinta Wasaaradda MOJCRAR	10%	30%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	2.8 Sii wadida barnaamijyada lagu tababarayo garsoor dhaqameedka.	20%	40%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	2.9 Hirgelinta nidaamka E-notary oo laga dhaqangelinayo nootaayooyinka gobolada Puntland	30%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	2.10 Xoojinta iyo awoodsiinta shaqada nootaalayaasha	10%	75%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	2.11 Kormeerka iyo qiimaynta nootaa-yooyinka	10%	65%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	2.12 Hirgelinta cilmi baaris lagu sameenayo habka xog keydinta Caddaaladda, iyadoo loo guurayo hab danabeysan ee xog keydinta	0%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
3. Adeegga xabsiyada	3.1 Barnaamijka waxbarashada Dhaqancelinta maxaabiista Iyo Dib ula noolasha bulshada	80%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	3.2 Horumarinta Nidaamka Maareynta Macluumaadka Xabsiyadda (caafimaadka, Fayadhowrka, samaynta xogta danabeysan IWM)	20%	45%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	3.3 Dhisida xafiiska cashada dadweynaha ee xabsiyada	0%	40%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	3.4 Bixinta agabka iyo qalabka tababarka	20%	75%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	3.5 Horumarinta iyo Tayaynta xabsiyadda	45%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland

QORSHAHA XUKUUMADDA 2025							
5							
4. Arrimaha Dastuurka	4.1 Waxbarashada madaniga ah ee Dastuurka Puntland	60%	85%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	4.2 In la abaabulo indheergarad Soomaaliyeed oo heerkiisu sareeyo si loo helo wadatashi iyo dib u eegista dastuurka	0%	45%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	4.3 Diyaarinta arimaha xalka u noqon kara dib u eegista dastuurka & dhamaystirka geeddi-socodka.	20%	40%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	4.4 Daabacaadda nuqulada dastuuriga ah ee kama dambaysta ah dastuurka Puntland.	20%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
5. Kor u qaadida barnaamijyada diinta islaamka iyo mabaadi'da Islaamka ee ku xusan manhajka iyo dhaqanka Islaamka	5.1 In la dhiso golaha sare ee culimada Puntland	20%	50%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	5.2 Hawlgelinta Golaha culimada iyo horumarinta siyaasadaha iyo habraacyada goluhu u baahan yahay	0%	45%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	5.3 Diiwaangelinta iyo dib-u-habaynta goobaha waxbarashada diiniga ah (Dugsiyada Qur'aanka iyo macaahida Islaamka)	35%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	5.4 Ka hortagga xagjirnimada rabshadaha wadata iyada oo loo marayo wadahadal iyo ka- qaybgal	50%	75%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	5.5 Manhajka Dugsiyada Quraanka	50%	95%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	5.6 Horumarinta adeegyada Xarunta Agoomaha	70%	85%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	5.7 In la sameeyo Xarumo Dhaqan celin oo dhamaystiran (3 xarumood oo tijaabo ah)	0%	40%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
6. Horumarinta iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha, oo ay ku jiraan xuquuqda haweenka iyo carruurta	6.1 U qareemida iyo Xoojinta hanaanka cadaalada haweenka	50%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	6.2 Isku-dubbaridka iyo Awood-siinta haweenka bah-wadaagta caddaaladda si ay u bixiyaan barnaamijyada caddaaladda xasaasiga ah ee haweenka.	65%	90%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	6.3 Kor u qaadida mabaadi'da iyo borotokoolka ilaalinta badbaadada ilmaha	45%	75%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	6.4 Qiimeynta Ciyaalka darbi jiifka ee Magaalooyinka Waaweyn	0%	50%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland

TIIRKA 3^{aad}

HORUMARINTA DHAQAALAHA

WASAARADAHA IYO HAYA'DAHA DAWLADDA EE HORMUUDKA U AH TIIRKAN	
1	Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha Iyo Iskaashiga Caalamiga Ah
2	Maaliyadda
3	Ganacsiga, Wershadaha iyo Maalgashiga
4	Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda
5	Xannaanada Xoolaha
6	Beeraha iyo Waraabka
7	Horumarinta Dekedaha
8	Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta
9	Warfaafinta, Isgaarsiinta, Tiknoolojiyadda iyo Dalxiiska
10	Duulista Hawada iyo Garoomada
11	Tamarta, Macdanta iyo Shidaalka
12	Deegaanka, Daaqa iyo Isbedelka Cimilada
13	Bangiga dhexe ee Dawladda
14	Maareynta Xogta Biyaha Iyo Dhulka
15	Hanti-dhawrka Guud

WASAARADDA QORSHEYNTA, HORUMARINTA DHAQAALAHA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA AH							
QORSHAHA	WAXQABADKA LA FILAYO	MEESHA, BARTALA JOOGO	BARTILMAAMEED	WAKHTTIGA		SADDEX BILOOD-KA	DEGMADA
				Bilaabasho	Dhammaad		
1.Diyaarinta qorshayaashayaasha Dowladda	1.1 Dhamaystirka qorshaha shanta sanno PFYDP-4.	10%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S2	Dhamaan Dowladda
	1.2 Diyaarinta qorshaha sanadlaha ah ee 2025	80%	100%	Jan-25	Feb-25	S1	Dhamaan Dowladda
2. Midaynta Qorshayaasha Qaranka iyo Qorshaha Puntland	2.1 Iswaafajinta qorshaha qaranka NDP9 iyo qarshaha horumarinta shanta sano ee Puntland (PFYDP-4)	0%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
3. kor-joogtaynta hay'adaha horumarinta arrimaha bulshada.	3.1 Qabashada shirarka wadatashiga ee qaybta arimaha bulshada iyo mudnanaha qorsheyaasha horumarinta 2025.	0%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
4. Diyaarinta iyo dib u eegista siyaasadaha, istaratijiyadaha iyo xeererka	4.1 Diyaarinta hanaanka siyaasadda yaraynta saboolnimada iyo kor u qaadida dhaqaalaha	0%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	4.2 Meel marinta xeerka qiimaynta iyo daba galka si kor loogu qaado qiimaynta iyo daba galka.	70%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	4.3 Hirgelinta buuga habraaca horumarinta siyaasadda guud ee dhammaan hay'adaha dawladda	60%	90%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	4.4 Diyaarinta iyo dib-u eegista istiraatiijiyada wasaaradda qorshaynta.	0%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	4.5 Diyaarinta iyo dhamaystirka Siyaasadda Qurbajoogta Puntland	20%	100%	Oct-25	Dec-25	S4	Dhamaan Dowladda
5. Kormeerka iyo Qiimaynta mashaariicda	5.1 In la kormeero lana qiimeeyo dhamaan mashaariicda ka socota puntland.	0%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
6.Dib u-eegista qorshaha PFYDP-4	6.1 Diyaarinta dib u-eegista sanadlaha ah ee qorshaha shanta sanno ee puntland 2025.	0%	0%	Nov-25	Dec-25	S4	Dhamaan Dowladda
7.Dib u hawl gelinta systemka (PIMES)	7.1 In dib loo hawl-geliyo nidaamka qiimeynta iyo kormeerka Puntland ee la wadaago (PIMES).	50%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
8.Sanduuqa Horumarinta Puntland - Puntland Development Fund	8.1 Diyaarinta iyo dhamaystirka Sanduuqa Horumarinta Puntland	25%	100%	Jul-25	Dec-25	S3-S4	Dhamaan Dowladda
9.Shirka Qurbajoogta Gudaha Dalka iyo xafiiska xiriirka qurbajoogta Puntland	9.1 Qabashada Shirweyne Qurbajoogta dalka joogta, sida aqoonyahanka, maalgashadayaal iyo furista xafiiska qurbajoogta Puntland.	15%	100%	Dec-25	Dec-25	S4	Dhamaan Dowladda

10. Xoojinta xiriirka Puntland iyo beesha caalamka	10.1 Kor u qaadista xiriirka iyo safarada kor loogu qaadayo xiriirka Puntland iyo beesha Caalamka, taas oo looga gol leeyahay sidii Puntland u yeelan lahayd saaxiibo cusub.	20%	100%	Jul-25	Dec-25	S3-S4	Dhamaan Dowladda
11. Dayactirka wasaaradda	11.1 Qalabaynta hoolka weyn ee wasaaradda qorshaynta	0%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Wasaaradda Qorshaynta
	11.2 Biyo gelinta dhamaan wasaaradda iyo samaynta waraabka casriga ah ee dhirta wasaaradda	60%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Wasaaradda Qorshaynta
	11.3 soo iibinta baska shaqaalaha iyo qodista ceelka wasaaradda	50%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Wasaaradda Qorshaynta
12. Dib u eegista Deeqaha iyo diwaangelibnta hay'adaha	12.1 Dibu eegista qaab-dhismeedka shaqaalaha waaxda.	50%	100%	Jan-25	March	S1	Wasaaradda Qorshaynta
	12.2 Madasha la socodka iyo isku dabaridka mashaariicda Puntland	20%	50%	Jan-25	March	S1	Dhamaan Dowladda
	12.3 Dib u eegista sharciga lagu maamulayo NGO-yada	10%	80%	Jan-25	June	S1-S2	Dhamaan Dowladda
	12.4 Dabagalka iyo xoojinta isla xisaabtanka mashaariicda	10%	50%	Mar-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	12.5 Sare u qaadista dakhliga cashuuraha ee haya'daha dalka ka shaqeeya	40%	85%	Apr-25	Dec-25	S2-S4	Dhamaan Dowladda
	12.6 Abuurista hab online ah oo lagu maamulo shahaadooyinka diiwan gelinta haya'daha gargaarka	10%	70%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	12.8 Dib u eegista iyo kor u qadista xiriirka haya'daha caalamiga	20%	70%	Mar-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	12.9 Xoojinta xiriirka hay'adaha Dowladda gargaarka iyo deeq bixiyayaasha.	10%	40%	Mar-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
13. Diyaarinta warbixinada iyo sahamada	13.1 Soo-saarista warbixinnada billaha ah ee la socodka sicirka maciishada	0%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	13.2 Diyaarinta warbixinta sanadlaha ah ee qiyaaska Wax-soosaarka dhaqaalaha Puntland 2024	0%	100%	Feb-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	13.3 Diyaarinta buugga xogta iyo xaqiiqooyinka Puntland	0%	100%	Mar-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	13.4 Qabashada sahanka tusayaasha badan ee arrimaha bulshada.	20%	100%	Apr-25	Dec-25	S2-S4	Dhamaan Dowladda
	13.5. Qabashada sahanka ganacsiyada.	30%	100%	May-25	Dec-25	S2-S4	Dhamaan Dowladda
14. Tababarada shaqalaha	14.1 Kor u qaadidida xirfada shaqaalaha Wasaaradda	30%	100%	May-25	Dec-25	S2-S4	Wasaaradda Qorshaynta

WASAARADDA MAALIYADA							
QORSHAHA	WAXQABADKA LA FILAYO	MEESHA, BARTA LA JOOGO	BARTILMAAMEED	WAKHTTIGA		SADDEX BILOOD-KA	DEGMADA
				Bilaabasho	Dhammaad		
1. Horumarinta Hanaanka Maamulka Maaliyadda	1.1 Xoojinta hufnaanta Iyo islaxisaabtanka dhanka waxsoo iibsiga iyo maamulka Maaliyadda	40%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	1.2 Horumarinta iyo hirgelinta habraacyada iibka (procurement procedures manual)	45%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	1.3 Hirgelinta Hanaanka wax iibsiga (E-Procurement System) .	10%	50%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	1.4 Dhamaystirka Nidaamka Lacag bixinta Shirkadaha ee loo yaqaan (Direct Vender Payment).	80%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhamaan Dowladda
	1.5 Iswafajinta madaxyo-xisaabeydka (Chart Of Accounts) Miisaaniyadda Dowlada dhexe iyo kuwa Dowladaha Hoose.	40%	80%	Feb-25	Dec-25	S2-S4	Dhammaan Gobolladda
	1.6 ku tababarida dawladda hoose madaxya xisaabeed (Chart Of Accounts)	10%	40%	Feb-25	Dec	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	1.7 Baahinta Warbixinadda Maaliyadda Dawladda	60%	90%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
2. Kobcinta Dakhliga Dowladda	2.1 kor u qaadida Dakhliga Canshuuraha Berriga	60%	90%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	2.2 Kordhinta iyo balaarinta dakhliga dowladda iyada oo laga duulayo hiigsiga 10 milyan	80%	90%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	2.3 kicinta cashuurta Faaidada shirkaddaha	30%	60%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Gobolladda
	2.4 kicinta cashuurta GST ee dhamaan ganacsiyadda	15%	75%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Gobolladda
	2.5 Dhamaystirka Habraacyadda iyo Forms Cashuuraha berriga	60%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	2.6 Dib u habayn lagu sameeyo cashuurta gaadiidka iyo badbaadda gaadiidka.	40%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	2.7 Dhamaystirka Shaciga Maamulka Dakhliga	75%	95%	Jan-25	June-25	S1-S2	Dhammaan Gobolladda
	2.8 Wacyigelinta Cashuuraha	30%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	2.9 Dhisida iyo dib u habaynta goobaha dakhliga	50%	75%	Jan-25	Dec-25	S1-S5	Dhammaan Gobolladda
	2.10 Dhismaha Dakhliga ee Magaaladda Bosaso	10%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Bosaso
	2.11 Dhisida iyo dib u habaynta goobaha dakhliga	50%	75%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	2.12 Kor uqaadida Canshuuraha Furdooyinka	50%	75%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	2.13 Diyaarinta Sharciga Furdooyinka Dowladda Puntland	10%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	2.14 Balaarinta Systemka Puntcas dhamaan goobaha Furdooyinka	60%	95%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	2.15 Dib u habaynta horumarinta Tacriifadda Furdooyinka	15%	100%	Jan-25	Jul-25	S1-S2	Dhammaan Gobolladda

3.0.Horumarinta Diyaarinta iyo fulinta Miisaaniyadda Dawladda	3.1. Iswaafajinta miisaaniyadda iyo Qorshaha horumarinta ee Dowladda	10%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	3.2. Hagaajinta kalsoonida dadweynaha	55%	100%	Mar-25	Dec-25	S2-S4	Dhammaan Gobolladda
	3.3. Diyaarinta hab-raaca siyaasadda miisaaniyadda	1%	100%	Jan-25	Apr-25	S1-S2	Dhammaan Gobolladda
	3.4. Diyaarinta warbixinadda hirgalka miisaaniyada	50%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	3.5. Hirgalinta miisaaniyadda sanad maaliyadeedka 2025	0%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	3.6. Diyaarinta miisaaniyadda muwaadinka 2025 (Hagaha miisaaniyadda)	0%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	3.7. Diyaarinta miisaaniyadda 2026	0%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	3.8. Horumarinta hanaanka miisaaniyadda	70%	100%	July-25	Dec-25	S3-S4	Dhammaan Gobolladda
	3.9. joogteynta isu dheelitirka miisaaniyadda	90%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
4. Xoojinta qaab dhismeedka sharciga iyo Siyaasaddaha Maaliyadda	4.1 Dhamaystirka iyo sharciiyaynta siyaasadaha iyo xeerka iibka	70%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	4.3.Magcaabidda Koox hawleedka (Policy Task Force) horumarinta Siyaasaddaha Wasaaradda	0%	40%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	4.4. Faafinta iyo fulinta sharciga Maamulka Maaliyadda.	20%	50%	Jan-25	Jun-25	S1-S2	Dhammaan Gobolladda
	4.5.Sharciga dakhliga iyo siyaasadaha maamulka	30%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	4.6.Dib u eegista iyo casriyaynta Xeerka kastamada.	70%	100%	Jan-25	Dec- 205	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	4.6.Diyaarinta siyaasadda ladagaalanka musuqa iyo xatooyada Wasaaradda (fraud and anti-corruption policy)	20%	50%	Feb-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
5.Dhiiri-gelinta, Hormarinta iyo Fududeynta ganacsiga Caalamiga ah	5.1. kordhinta wax dhoofinta iyo wax soo dejinta iyadoo la abuurayo xiriirada dibada sida Ethiopia iyo gobolada kale ee soomaaliya	25%	30%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	5.2. Xoojinta Kastamada, qiimaynta badeecooyinka iyo Fududeynta ganacsiga	30%	50%	Jan-25	Dec- 205	S1-S4	Furdooyinka
6. Dib u habeynta iyo Horumarinta Hantida dowladda	6.1.Dhamaystirka Diiwaan galinta iyo Calaamadaynta hantida Dawlada.	70%	90%	Jan-24	Dec-24	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	6.2 Sumadaynta iyo Qiimaynta dhamaan Hantida Dawladda	60%	90%	Jan-24	Dec-24	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	6.3. Ku xeraynta Hantida Dowladda nidaamka maaraynta Maaliyadda Puntland (PFIMS) iyadoo lagu daraayo warbixinta Xisaabxirka Dawladda ee Sannadlaha ah.	30%	50%	Jan-24	Dec-24	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	6.4 Dhaqan gelinta siyaasada Hantida (Asset Policy) in la gaadhsiiyo kudhaqanka siyaasadda hay'addaha dawlada oo dhan	40%	60%	Jan-24	Dec-24	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
7. Dhamaystir nidaamka Khasnada Midaysan(TSA) iyo isku xirka Nidaamka Maaraynta Maaliyadda (FMIS)	7.1 In la dhameystiro Xog Ururinta Hay’adaha Dawladda inta dhiman Laguna Shubo Systemka.	30%	50%	Jan-24	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
8. Casriyeeyaynta hab-socodka shaqada iyadoo la adeegsanayo habka iswada (Automation)	8.1. In PFIMS la gaarsiiyo laguna xiro dhammaan degmooyinka, kastamada iyo habka wax soo iibsiga Wasaaradda, diyaarinta miisaaniyada Dawladda iyo xogta shaqaalaha	60%	100%	Jan-24	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	8.2. In la sii Casriyeeyo hanaanka PUNT-CAS ee furdooyinka Puntland sidoo kale laga hirgeliyo goobaha furdooyinka ee dhiman.	30%	50%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Furdooyinka
9. Horumarinta Dhaqaalaha Dalka iyo dhiiregelinta abuurista ilo dhaqaale oo cusub	9.1.Diyaarinta daraasad ku saabsan sida looga faa'iidayasan lahaa khayraadka dalka sida Xoolaha, Kalluumaysiga , Maydiga iyo Macdanta.	15%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Gobolladda
	9.2.Dhameystirka Daraasada Xiriirka ka dhexeeya Cashuurta iyo kororka qiimaha maciishada daruuriga ah ee magaalada ee Garowe	50%	90%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Garowe

WASAARADDA GANACSIGA, WARSHADAHA IYO MAALGASHIGA							
QORSHAHA	WAXQABADKA LA FILAYO	MEESHA LA JOOGO	BARTILMAAMEED	WAKHTIGA		SADDEX BILOOD-KA	DEGMADA
				Bilaabasho	Dhammaad		
1.Dibu-habaynta iyo curinta siyaasadaha iyo Xeerarka Ganacsiga,Warshadaha iyo Maalgashiga Puntland.	1.1 dhamaystirka iyo dhaqan-galinta siyaasadda iyo Xeerka Shirkadaha wadaagga PPP.	90%	100%	Jan-25	Jun-25	S1-S2	Puntland
	1.2 Dhamaystirka iyo ansixinta Siyaasada iyo xeerka Warshadaha Puntland.	50%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	1.3. Dhamaystirka xeerka Shirkadaha Ganacsiga Puntland	50%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	1.4 Dib u eegista xeerka Shatiyada Ganacsiga.	70%	100%	July-25	Aug-25	S3	Puntland
	1.5 Dib u eegista xeerka dhiirigalinta Maalgashiga.	80%	100%	July-26	Sep-25	S4	Puntland
	1.6 Dhagangelinta xeerka sumadaha Ganacsiga	50%	100%	Feb2025	Dec-25	S1-S4	Puntland
2. Qabashada Shirwaynaha Maalgashiga Puntland 2025.	2.1 Diyaatinta qabsoomida Shirwaynaynaha Maalgashiga 2025, si loogu soo bandhigo Khayraadka dalkeena si loo maalgashto.	0%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Garoowe
3. Qabashada Carwo Bandhigeedka 2025 Ee Ganacsiga Dawladda Puntland DPL	3.1 Hirgelinta Carwo sanadle ah oo ay ka soo qayb galaan Dhamaan shirkadaha , oo isugu jira shirkadaha Wax soo saarka iyo kuwa Wax soo dajiya ee dalka.	0%	100%	Jan-25	Jun-25	S1-S2	Bosaaso
4. Qabashada Doorashada Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland.	4.1 Diyaarinta qabashada doorashada rugta ganacsiga iyo warshadaha Dawladda Puntland	30%	100%	Jun-25	Sep-25	S3	Bosaaso
5. Dhismaha Xarunta Boosaaso Ee Wasaaradda Ganacsiga	5.1 Diyaarinta dhaqaalaha Dhismaha xarunta dhexe ee Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Maalgashiga	0%	100%	Jan-24	Sep-24	S1-S3	Bosaaso
6. Tayeynta iyo balaarinta shaybaarka xafiiska tayo-dhowrka Badeecadaha.	6.1 In la balaariyo shaybaarka lana geeyo shaybaaro cusub dekada Garacad, ayraboorada iyo Kastamada Puntland wax ka soo galaan.	80%	90%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Bosaaso
7. Horumarinta Hab online data base ah, ee shatiyada iyo sumadaha Ganacsi ee Wasaaradda	7.1 Waxaa la dhamaystirayaa habka online Data-Baseka oo lagu bixiyo shatiyada, si awood ugu yeesho in sumadaha Ganacsi ee Puntland lagu ilaaliyo.	40%	100%	Jan-25	Jun-25	S1-S2	Garoowe
8. Hirgalinta Suuqyo Ganacsi	8.1 Samaynta ugu yaraan 3 Suuq oo u gaar ah Ganacsatada yaryar sida Qudaarlayda,Waratada, hilibka iyo caanaha.	50%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	saaxo,Qardho, Badhan.
9. Dardar Galinta Kastamka Tuur-dibi	9.1 . Dhamaystirka dhismaha iyo qalabaynta kastamka tuurdibi iyo furintaanka Kastamka.	70%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Galdogob

QORSHAHA XUKUUMADDA 2025

II

10. Dhiiri-gelinta Ganacsatada	10.1 Raadinta Suuqya Ganacsi oo caalami ah, suuq gaynta Wax soo saarka Dalka, tababaro loo sameeyo Ganacsatada iyo dadka hal-abuurka Ganacsi leh.	80%	90%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
11. Kobcinta Dakhliga Wasaaradda	11.1 . Kor u qaadida ilaha Dakhligu kasoo xarooda Wasaaradda Ganacsiga, sida Shatiyada, Sumadaha Ganacsiga iyo ilaalinta Tayada badeecadaha Puntland.	70%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
12. Tababarka Shaqaalaha iyo dib dayactirka xarumaha Wasaarada ee Gobollada.	12.1 Kor u qaadida aqoonta iyo xirfahaha shaqaalaha iyo qalabaynta xarumaha Wasaarada Ganacsiga, Warshadaha iyo Maalgashiga si loo dardargaliyo waajibaadka shaqada.	40%	100%	Mar-24	Sep-25	S1-S3	Puntland
13. Qabashada carwada wax soosaarka warshadaha Puntland	13.1 Hirgalinta Carwo sanadle ah oo ay ka soo qayb galaan Dhamaan Warshadaha , oo isugu jira warshadaha Wax soo saarka si loo dhiirigaliyo wax soo saarka warshadaha Puntland. La ogaado heerka wax soo saarka gudaha si aan wadanka loo keenin	60%	100%	Mar-24	Sep-25	S1-S3	Puntland
14. Jihaynta Maalgashiga Puntland	14.1. Hagida maalgashiga Puntland si loo maalgashado qaybaha dihin ee u baahan maalgashiga, sidoo kale loo joojiyo maalgashiga qaybaha horay loo maalgashaday sida Real Estate oo aysan u sababin dhaqaale burbur ku yimaada Maalgashatada & dhaqaalaha wadanka.	60%	100%	Mar-24	Dec-25	S1-S4	Puntland
15. Qabashada Tababaro kor loogu qaadayo aqoonta iyo xirfadaha Ganacsatada yaryar	15.1 Xoojinta ganacsiga yaryar sida Qudaarlayda,Waratada, hilibka,caanaha, iskaashatooyinka, Ururada hagbadaha(VSLA) si kor loogu qaado aqoonta iyo xirfadooda ganacsi.	70%	100%	Apr-24	Dec-25	S2-S4	Puntland
16. Dardar galinta adeega xogbixiye ee Wasaarada Ganacsiga	16.1 Xogbixiye waa adeeg casri ah oo u sahlaya ganacsatada inay si fudud u helaan xogta la xiriirta habraacyada diwaangalinta ganacsiyada iyo qaadashada laysamada ganacsi iyagoo jooga goobahooda ganacsi.	65%	100%	May-24	Dec-26	S2-S4	Puntland

WASAARADDA KALLUUMEYSIGA IYO KHEYRAADKA BADDA							
QORSHAHA	WAXQABADKA LA FILAYO	MEESHA LA JOOGO		WAKHTIGA		SADDEX BILOOD-KA	DEGMADA
			BARTILMAAMEED	Bilaabasho	Dhammaad		
1. Koru-qaadista maamulka iyo tayadda Wasaaradda.	1.1 Dibu eegista xeerka kalluumeysiga	90%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Puntland
	1.2 Sameynta xeerka iskaashatooyinka kalluumeysiga	40%	100%	Apr-25	Jun-25	S2	Dhammaan Puntland
	1.3 Dibu eegista shaqadda iyo qaab-dhismeedka wasaaradda.	30%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
	1.4 Sameynta qorshaha shanta sano ee wasaaradda 2025-2029.	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
	1.5 Sameynta siyaasadda noolaha dabar go'aya iyo ilaalinta aaga kalluumeysiga ka caagan.	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
	1.6 Dhisidda xafiiska garowe ee wasaaradda kalluumeysiga.	10%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Garowe
	1.7 Qalabeynta xafiisyadda xeebaha ee wasaaradda kalluumaysiga.	10%	100%	Aug-25	Oct-25	S3	Bareeda, Lasqoray & EYL
	1.8 Kor uqaadista aqoonta shaqaalaha wasaaradda (6 tababar).	10%	100%	Mar-25	Jun-25	S2	Bosaso, Garowe
2. Horumarinta iyo maamulidda Xogaha Kalluumeysiga (FMIS,AIS &others)	2.1 Hirgelinta adeegsiga hanaanka lasocodka gaadiidka kalluumeysiga badda (AIS System).	60%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
	2.2 Sameynta nidaamka danabeysan ee Wasaaradda (integrated management system).	40%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
	2.3. Ku tababaridda nidaamka danabeysan ee Wasaaradda.	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
3. Dhisidda kaabayaasha dhaqaalaha iyo kor uqaadista maalgashiga kalluumeysiga	3.1 Dhisidda suuqa kalluumeysiga caluula	20%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Calula
	3.2 Dhisidda labo marso oo kalluumeysi ah	5%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Calula iyo Bosaaso
	3.3 Keenista 1 baraf dhaliye iyo baraf keydiye	5%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Bosaso iyo Bareeda
	3.4 Dhisidda suuqa kalluumeysiga ee Bosaso	10%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Bosaso
	3.5 Maalgelinta kalluumeysatadda yar-yar (140 qof)	40%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Banderbayla
	3.6 Qabashada shirweynaha maalgashiga kalluumeysiga	10%	100%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Garowe
4. Koru-qaadida dakhliga dhexe ee dowladda	4.1 Diwaangelinta kalluumeysatadda, wakiiladda iyo gaadiidka kalluumeysiga	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
	4.2 Hirgelinta badku galka gaadiidka kalluumeysiga ee shisheeye ah	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
	4.3 koru qaadida xirfadda shaqaalaha xeebaha ee kalluumeysiga (iskuduwe & Fidiye)	10%	100%	July	Sep-25	S3	Dhammaan Dowladda

5. Kor u-qaadida cunidda kalluunka	5.1 sameynta sheybaarka kalluunka iyo ku tababaridda shaqaalaha.	10%	80%	Jun-25	Sep-25	S3	Dhammaan Puntland
	5.2 sameynta habraacyadda tayadda iyo suuqgeynta kalluunka	10%	100%	Oct-25	Dec-25	S4	Dhammaan Puntland
	5.3 qabashaha todobaadka cunista kalluunka Puntland	10%	100%	Jan-25	Jun-25	S1-S2	Dhammaan Puntland
	5.4 wacyigelinta faa'idada cunidda kalluunka	10%	100%	Jun-25	Aug-25	S3	Dhammaan Puntland
6. Wax-barashadda Kalluunka	6.1 Bixinta kharashka deeq waxbarasho 45 ardey.	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Bosaso
	6.2 Qeybinta agabka caruurta ee waxbarashadda	10%	100%	Jan-25	Jun-25	S1-S2	Dhammaan Puntland
	6.3 Bixinta kharashka 4 arday deeq waxbarasho ee dalka dibadiisa (Master Program)	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dalka Dibadiisa
	6.4 Hirgelinta heshiiska cilmi baaris kalluun (Jamacadda Bosaso)	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
	6.5 Horumarinta, tayeynta iyo uqareemidda mac'hadka xirfadda culluumta badda (SMAFSI).	10%	100%	Jul-25	Aug-25	S3	Dhammaan Puntland
	6.6 Kor u qaadida aqoonta iyo xirfada kalluumeysatadda Puntland	10%	100%	Oct-25	Dec-25	S4	Dhammaan Puntland
7. Ilaalinta deegaanka iyo kheyraadka badda	7.1 Ku tababaridda siyaasadda noolaha dabar go'aya iyo ilaalinta aaga ka caagan kallumaysiga.	0%	100%	Jun-25	Sep-25	S3	Dhammaan Puntland
	7.2 Sameynta daraasado ku saabsan keymaha iyo keydka kalluun.	0%	100%	Jun-25	Sep-25	S3	Dhammaan Puntland
	7.3 sameynta nadiifinta xeebaha (beach clean-up)	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
8. Ilaalinta iyo kormeerka badda	8.1 Sameynta kormeero lagula dagaalamayo kalluumeysiga sharci darrada	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
	8.2 Tayeynta iyo kor u qaadista ciidanka ilaalada xeebaha Puntland	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland
	8.3 soo gudbinta warbixinada dhaqdhaqaaqa gaadiidka kalluumeysiga (AIS monthly report)	10%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Dhammaan Puntland

WASAARADDA XANAANADA XOOLAHA							
QORSHAHA	WAXQABADKA LA FILAYO	MEESHA LA JOOGO	BARTILMAAMEED	WAKHTIGA		SADDEX BILOOD-KA	DEGMADA
				Bilaabasho	Dhammaad		
1. Tayeynta Wasaaradda Xannaanada Xoolaha.	1.1 Qabashada tababarada maamul iyo mid farsamo ee shaqaalaha Wasaaradda.	45%	70%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Wasaaradda
	1.2 Hormarinta iyo dib u eegista shuruucda iyo siyaasadaha.	30%	65%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
	1.3 Soo iibinta gaadiid ay leedahay wasaaraddu	25%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Puntland
2. Horumarinta Wax-soosaarka Calafka Xoolaha.	2.1 Xoolo-dhaqato beeralayda ayaa lagu taageerayaa beerista calafka xoolaha, aqoonta, abuurka calafka, qalabka dhul-diyaarinta, jarista iyo shiididda calafka xoolaha iyo kaydka calafka.)	30%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Garowe,Galkio,Bur salax, Galdogob, Xarfo,
	2.2 Hirgalinta 3 beerood oo waaweyn oo lagu beerayo calafka Xoolaha oo dowladdu leedahay.	0%	50%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Punland
	2.3 Hirgalinta 3 beerood oo waaweyn oo lagu beerayo calafka Xoolaha oo logu taakulaynayo waxsoosaarka calafka xoolaha	10%	70%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Garowe,Galkio,Qar dho
	2.4 Qaybinta agabka nafaqaynta xoolaha(Mineral Blocks)	10%	50%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Bosaso,Ufayn, Carmo, Waciye
	2.5. Qeybinta baagaga biyaha ee reer guuraaga	15%	35%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Degmooyinka
3. Horumarinta dhaqashada digaaga iyo shinida	3.1. Qeybinta digaaga nool, ku tababarista dhaqashada digaaga, dhismaha hoyga digaaga, quudinta iyo daaweynta digaaga	10%	60%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Garowe, Bossaso, Ufeyn, Badhan, Dhahar, Baargaal
	3.2. Dhiiragalinta dhaqashada shinida, qaybinta agabka dhaqashada shinada iyo tababarista shini dhaqatada	15%	65%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Degmooyinka
4. Dhismaha iskaashatooyinka wax soosaarka Xoolaha	4.1 Dhisida iskaashatada caanaha, digaaga, shininda, calafka iyo Hilibka	20%	65%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Degmooyinka
	4.2 Qaybinta weelka caanaha	10%	45%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Bosaso,Ufayn, Carmo, Waciye
5. Wacyigelinta xooladhaqatada iyo fidinta adeega caafimaadka Xoolaha	5.1 Hirgalinta dugsi goobeedyada xoola dhaqatada	10%	65%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Degmooyinka
	5.2 Xoolo-dhaqatada wacyigalintooda waxaa xooga lagu saaraayaa, isticmaalka dawooyinka, fayadhawrka, cuddurrada xoolaha iyo dadka u kala gudba, maareynta xoolaha, u adkaysiga isbadalka cimillada, tallaalka xoolaha	25%	55%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Degmooyinka
6.Horumarinta Caafimaadka Xoolaha	6.1. Hawlgalinta gaadiidka gurmadka degdega ah ee caafimaadka xoolaha	50%	75%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Degmooyinka
	6.2. Qalabaynta iyo Hawlgalinta sheybaarada	35%	70%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Garowe, Galkacyo, Qardho
	6.3. Ololaha daaweynta iyo Talaalka Xoolaha	50%	80%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Degmooyinka
	6.4. Hawlgalinta Xarumaha Daaweynta Xoolaha	15%	50%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Dhammaan Degmooyinka
	6.5. Dhismaha kawaanada iyo seyladaha xoolaha	20%	55%	Jan-25	Dec-25	S1-S4	Garowe, Qardo, Galkacyo, Badhan

WASAARADDA BEERAHA IYO WARAAABKA							
QORSHAHA	WAXQABADKA LA FILAYO	MEESHA LA JOOGO	BARTILMAAMEED	WAKHTIGA		SADDEX BILOOD-KA	DEGMADA
				Bilaabasho	Dhammaad		
1. Diyaarinta siyaasadaha iyo hageyaasha wasaaradda	1.1 Diyaarinta, ansixinta iyo faafinta Siyaasadda ka ganacsiga Waxsoosaarka Beeraha.	10%	100%	Mar-25	Jun-25	S1-S2	Puntland
	1.2 Samaynta hage dhamaystiran ee tababarka beeralayda Puntland (Training Manual) kaas oo ka kooban xirfadaha muhiimka u ah beeralayda	0%	100%	Jan-25	Mar-25	S1	Puntland
